# Waxbarashada Gaarka ah: Wa ayo "waalidka" lagu sheegey Xeerka Waxbarashada Shaqsiyaadka Laxaadka la'a (IDEA)?



IDEA waxaa weeye sharci federal ah oo loogu talo geley ardayda qaadata adeegyada waxbarashada gaarka ah - sida, ardayda leh Individualized Education Program (Barnaamijyada Waxbarashada Shakhsi Ahaaneed, IEP). Sharcigan waxaa kamid ah sharaxa gaarka ah ee cida "waalidka" (Go'aan Gaadhayaasha Kowaad) uu yahay sida uu dhigayo IDEA wixii ujeedooyinka waxbarashada gaarka ah.

Ujeedada tilmaamahan waxaa weeye in laga caawiyo shaqaalaha DCYF iyo waalidka korsanaya ay ka wada shaqeeyaan degmo dugsiga bixinta adeegyada waxbarashada gaarka ah ee la siiyo ardayda ku jira daryeelka korsashada.

"Waalidka" (Go'aan Gaadhaha Waxbarashada) sida uu dhigayo IDEA waxaa weeye cida guud ahaan loo arko waalidka dhalay ama waalidka korsada, xataa hadii ilmuhu aanu la noolayn waalidkiisa. Tusaale ahaan, marka dhalinyarta ay ku jirto daryeelka guriga ka baxsan ay la nooshahay waalidka korsanaya, waalidkood waxay leeyihiin xuquuqda iyo masuuliyada sharci, oo waxaa kamid ah go'aamada waxbarashada. Hadii waalidku aanu doonaynin ama aanu diyaar u ahayn inuu noqdo "waalid" (Go'aan Gaadhaha Waxbarashada) sida uu dhigayo IDEA, waalidka korsanaya, ee la siiyay awooda masuuliyad ayaa gaadhaya go'aamada waxbarashada, ama shakhsiya ilmuhu la nool yahay ee u matalaya waalidka dhalay ama korsanaya ayaa buuxin doona kaalintaas.

Imo kasta oo qaba laxaad la'aan ama looga shakiyo laxaad la'aan waa inuu leeyahay ogolaanshe sharci oo "waalid" (Go;aan Gaadhaya Waxbarashada) sida uu dhigayo IDEA, kaas oo matali kara iyaga.

## Waxaa weeye "waalidka" (Go'aan Gaadhaha Waxbarashada) ee hoos yimaada IDEA ee:

- Hela wargelinta kulamada IEP iyo isbedelada uu ku taliyay dugsigu
- Waxaa la siiyaa fursad lagaga qayb galayo kulamada oo lagu gaadhayo go'aamo ku saabsan waxa u wanaagsan waxbarashada iyo adeegyada ilmaha
- Waxa uu isticmaali karaa ikhtiyaaro xalinta muranka waxbarashada gaarka ah si loo xaliyo muranada

## Yaa noqon kara "waali" (Go'aan Gaadhaha Waxbarashada) sida uu dhigayo IDEA ee Waxbarashada Gaarka ah?

### Waalidka (dhalay) hadii maxkamad ayna xadidin xuquuqahooda

- Waalidka qaar leh xuquuqda go'aan gaadhaha marka ilmaha laga saaro masuuliyada iyada oo maxkamad ay xadido moojee xuquuqdan.
- Inkasta oo waalidku ay tahay inay ahaado go'aam gaadhayaasha waxbarashada ee waxbarashada gaarka ah (iyada oo maxkamadu ay ka xadido moojee), waalidka koriya ayaa gaadhi kara go'aamada maalin walba ee taageerada caadiga ah.

### Waalidka korinaya hadii waalidka dhalay aan la heleynin/ diyaar u ahayn

- Waalidka korinaya ayaa sidoo kale noqon kara "waalidka" isaga uu dhigayo IDEA hadii:
  - Qoyska dhalay hadii aan la heleynin, aan ka jawaabin dalabyada kulmada, ama la sheegey in aanu doonaynin inuu ka qayb galo (oggow: waalidka dhalay ama korsada la waayay balanta kulanka oo sidoo kale la waayay, aan ka jawaabaynin taleefanka ama aad doonaynin inuu ka qayb galo);
  - Maxkamadu waxay xaq u leedahay inay meesha ka saarto xuquuqda waalidka; ama
  - Waalidka dhalay ama korsanaya oo dhintay.

Washington State Department of CHILDREN, YOUTH & FAMILIES

Washington Office of Superintendent of PUBLIC INSTRUCTION

### Maxkamada ayaa u magacawday wakiil waxbarasho

- Waaxdu waa inay sheegtaa wakiilka waxbarashada ee dhalinyarta ee ka yar fasalka lixaad ilaa laba iyo tobnaad ee ay ka waajibto nidaamka ku tiirsanaanta ee buuxiyay mid kamid ah shuruudaha soo socda:
  - Dhamaan xuquuqda waalidka waa la joojiyay;
  - Waalidka lama heli karo sababta oo ah xabsi-ku-hayn ama xadidaano kale;
  - Maxkamada ayaa xadiday xidhiidhka ruuxa dhalinyarta ah iyo waalidka; iyo
  - Ruuxa dhalinyarta ah waxaa lagu xareeyay goob dhaqan celin dhaqan ahaaneed maxkamaduna way xadiday xuquuqda waxbarasheed ee waalidka.
- Wakiilka maxkamadu magacawdo waxaa lagu sheegaa RCW 13.34.045 (**https://app.leg.wa.gov/RCW/default.aspx?cite=13.34.045**).

### Waalidka uurka ku qaaday ee ay degmadu magacawdo

- Sida uu dhigayo IDEA, degmo dugsi kasta waxaa ku waajib ah inay xaqiijiso waalidka uurka ku qaaday in loo magacaabo ardayda u qalma waxbarashada gaarka ah marka "waalidka" (Go'aan Gaadhaha Waxbarashada) aanu loo magacaabin ardayga.
- Kaliya marka aanu jirin ruux u qalma "waalid" (Go'aan Gaadhaha Waxbarashada) ahaan sida uu dhigayo IDEA ayaa degmada dugsiga looga baahan yahay inay u magacawdo waalidka uurka ku qaaday. Sharciga magacaabista waalidka uurka ku qaaday waxa uu ku jiraa WAC 392-172A-05130 (**https://app.leg.wa.gov/WAC/default.aspx?cite=392-172A-05130**). Si tani u dhacdo: waalidka looma magacaabi karo, ama xuquuqda waalidka ayaa la joojiyay, oo maxkamadu ma hayso wakiil waxbarasho oo ay u magacawdo.
- Degmo dugsi kasta waxay u badan tahay inay yeelato qaybta 2161 ee siyaasadooda iyo nidaamyadooda Waxbarashada Gaarka ah ee nidaamkan. Xafiiska Waxbarashada gaarka ah ee OSPI waxa uu leeyahay khayraad ku jira websaytkooda oo lagu taageerayo degmooyinka oo waxaa kamid ah:
  - Balanta, Tobobarka iyo Waalidka Waalidka La Magacaabay (**https://ospi.k12.wa.us/sites/default/files/2022-12/surrogateparent.pdf**)
  - Kaalinta Waalidka Uurka Ku Qaaday - Shaxda Degmooyin Dugsiga (**https://ospi.k12.wa.us/sites/default/files/2022-12/rolesurrogateparent.docx**)

### Dadka dhalinyarta ee 18 ilaa 22 jirka

- Shuruucda waxbarashada gaarka ah ee uga wareejinta xuquuqda "waalidka" ardayga 18 jirka ah sida uu dhigayo WAC 392-172A-05135. (**https://app.leg.wa.gov/WAC/default.aspx?cite=392-172A&full=true#392-172A-05135**)
- Waxaa jira nidaamyo iyo ikhtiyaaro sii waditaanka ka qayb ahaanshaha waalidka, xataa hadii ruuxa dhalinyarta ahi uu noqdo 18 jir (sida, awooda qareen, koriyaha, imw.).

## Yaan noqon karin "waalid" (Go'aan Gaadhaha Waxbarashada) sida uu dhigayo IDEA?

Shakhsiyaadka ku sugan xaalada iska hor imanaysa ee shakhsi ahaaneed ama shaqo **waa in** aanu noqon Go'aan Gaadhaha Waxbarashada, waxaa kamid ah:

- Shaqaalaha bulshada/shaqaalaha DCYF
- Shaqaalaha guriga kooxda ama
- OSPI ama shaqaalaha degmada dugsiga



## SU'AALO?

Wixii su'aalo ah ee ku saabsan shuruucda waxbarashada iyo qawaaniinta gaarka ah, fadlan kala xidhiidh xafiiska Waxbarashada Gaarka ah ee OSPO: **speced@k12.wa.us** ama 1-360-725-6075

Wixii su'aalo ku saabsan go'aaminta cida noqonaysa "Waalidka" ama Go'aan Gaadhaha Waxbarashada ee ardayda ku jira daryeelka korsashada, fadlan kala xidhiidh Kooxda Waxbarashada DCYF: **k12education@dcyf.wa.gov**

*Haddii aad rabto nuqullo dhukumenti ah oo qaab kale ah ama luuqad kale ah, fadlan kala xidhiidh DCYF Constituent Relations (DCYF Xidhiidhada Qeybaha) 1-800-723-4831 ama iimaylka* ***communications@dcyf.wa.gov****.*

DCYF PUBLICATION PPS_0093 SM (07-2025) Somali